Kooxda IDG ee DMCC

120 Emarat Atrium Building, Sheikh Zayed Rd, PO Box 50784, Dubai, UAE

# SIYAASADDA SINNAANTA, KALA DUWANAANSHAHA IYO KA QEYB GALINTA (EDI)

Agoosto 2018

NOOCA 1

## KOONTAROOLKA NOOCA

| NOOCA | LA SOO SAARAY | MUALIF | WAXAA IN LA SHAACIYO AMRAY |
|---|---|---|---|
| 1 | AGOOSTO 18 | G WINTER |  |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |

# TUSMO

**TUSMO** ..... **1**

**Siyaasadda sinnaanta, kala duwanaanshaha iyo ka qeyb galint** ..... **2**

**1. Ujeedooyinka Siyaasadda** ..... **2**

1.1. Ujeedka Siyaasadda EDI ..... 2

1.2. Ballanqaadka IDG ay ka Qaaday EDI ..... 2

**2. Siyaasadda EDI** ..... **3**

2.1. Ku habboonaanta ..... 3

2.2. Caqabadda hortaagan IDG ..... 3

2.3. Qiimeynta Kala Duwanaanshaha ..... 3

**3. Oraah Guud** ..... **3**

3.1. Baaxadda ..... 3

3.2. Takoor aan Qiil Lahayn ..... 4

3.3. Takoorka iyo Sharciga ..... 4

3.4. Takoor – Ujeedooyinka iyo Afkaar Khaldan oo Laiska Aamino ..... 4

**4. Sababaha Aasaasiga ah ee Takoorka** ..... **4**

4.1. Da'da ..... 5

4.2. Naafonimo ..... 5

4.3. Jinsi ..... 5

4.4. Qolo/Qabiil iyo Dhaqan ..... 5

4.5. Diin iyo Wax la Aaminsan yahay ..... 6

4.6. Jinsiga uu la Galmoodu Qofi ..... 6

4.7. Sinnaanta iyo Mushaarka ..... 6

4.8. Waxyaabaha la Tabanayo iyo Cabashooyinka ..... 6

**5. Mas'uuliyadaha** ..... **7**

# SIYAASADDA SINNAANTA, KALA DUWANAANSHAHA IYO KA QEYB GALINTA (EDI)

## 1. Ujeedooyinka Siyaasadda

IDG waxaa ka go'an inay ku guuleysato deegaan shaqo oo uusan ka jirin takoor aan qiil lahayn kaasoo ah dhanka shaqaaleysiinta, sii haysashada shaqaalaha, tababar iyo horumarinta shaqaalaha ayadoo uu ku salaysan yahay takoorku da' naafonimo, jinsi uu ku jiro qof jinsigiisii asalka ahaa baddalay, xaaladda HIV/AIDS, xaaladda guurka sida wada noolaansho madani ah, uur iyo dhalmo, fikir siyaasadeed, qolo/qabiil, diin, wax la aaminsan yahay, jinsiga qofi la galmoodo, taariikhda shakhsiga ee dhaqan dhaqaale, muddo xabsi inuu qofku ku jiray kaddib markii maxkamadi xukunno ku ridday, hawl midow ganacsi ama xubin ka noqosho midowgaas, qaabka shaqada, in qofku leeyahay dad ku taxaluqa ama in kale, ama wax kaloo sababo ah kuwaasi oo aan ku habbooneyn gaaridda go'aannada.

Siyaasaddeena EDI waxay xisaabta ku dareysaa heerarka sharciga ee habboon. Waxaan diiradda saareynaa inaan adeecno oo sare u qaadno sharci dejin sinnaan ku salaysan ayadoo la raacayo arrinkaasi sida uu yahay. Waxaan isku daynaa inaan ka baaqsano takoor aan qiil lahayn kaasi oo aan garawsanay inuu caqabad ku yahay sinnaanta, kala duwanaanshaha, ka qeyb galinta iyo xaquuqul insaanka.

### 1.1. Ujeedka Siyaasadda EDI

Siyaasaddaan waxay siisaa jiheyn dhammaan shaqaalaha ka shaqeeya ammaanka ee IDG si loo xaqiijiyo habdhaqanno aan xaq ahayn ama takoor ah inaysan ka shaqeyn shirkadda dhexdeeda. Siyaasadda, iyo habdhaqannada afkaarta ku salaysan iyo habdhaqannada daba socda ee ka imaanaya, sidoo kale waxay u muujiyaan macaamiisheena in IDG ay bixiso adeegyo taxaddar leh oo waafaqa heerarka ugu wacan ee EDI.

### 1.2. Ballanqaadka IDG ay ka Qaaday EDI

IDG waxaa ka go'an ujeeddooyinka EDI ee soo socda:

• Fahmidda, qiimeynta iyo si wanaagsan oo wax suubisa in loogu shaqeeyo kala duwanaanshaha si loo awood siiyo ka qeybgal xaq ah oo buuxa oo ah gudaha shaqadeena iyo hawlaha;

• Xaqiijinta in uusan jirin takoor aan xaq ahayn oo loo adeegsado shaqaaleysiinteena, xulashada, waxqabadka, maareynta iyo hannaano kale;

• Xaqiijinta ficil sare u qaada sinnaanta; arrintaan waxaa ku jira in la sameeyo baaritaan ku saabsan sinnaanta iyo qiimeynta saamaynta siyaasadaha iyo shaqooyinka iyo horumarinta qorshe hawleedyada kala duwanaanshaha;

• Ula tacaamulidda shakhsiyaadka aanu la shaqeyno si xaq ah oo sharaf iyo qaddarin leh;

• Ciyaaridda dawrkeena ku saabsan saaridda caqabadaha iyo wax ka qabashada isku dheellitirnaan la'aanta ay sababeen sinnaan la'aan iyo takoorka aan qiilka lahayn.

Dhammaan shaqaalaha waxaa laga doonayaa inay xaqiijiyaan in habdhaqankoodu uu waafaqsan yahay siyaasaddaan. Waxaan sidoo kale u baahan nahay in kalyantiga iyo macaamiisha, dadka shaqo wadaagga la yahay iyo kuwa wax qeybiya la ogeysiiyo siyaasaddaan ayna ku shaqeeyaan.

# 2. Siyaasadda EDI

Sinnaan waxay ku saabsan tahay in dadka loola dhaqmo si xaq ah, aan dhanna loo janjeerin aanna lahayn eex iyo abuuridda goob shaqo iyo bulshada intaasi ka badan oo ah kuwo wax dhiirigaliya oo qiimeeya kala duwanaanshaha sarena u qaada sharafta iyo ka qeyb galinta.

## 2.1. Ku habboonaanta

Siyaasaddaan waxay ku habboon tahay caalamka oo dhan laakiin maareeyeyaasha Dalka waxaa ay tahay inay arrintaan u maareyaan sida xaaladaha maxalliga ah ay saamaxaan. Markii habdhaqannada iyo sharcigu ay aad u horumarsan yihiin oo u ballaaran yihiin, waxaan diiradda saareynaa inaan waafaqno arrimahaan. Dhammaan shaqaalaha ayadoon sababna loo eegeyn ayaa laga doonayaa inay xaqiijiyaan in habdhaqankoodu waafaqsan yahay siyaasaddaan taasi oo taageerta xaquuqul insaanka aasaasiga ah ee qof walba inaan takoor aan qiil lahayn lagu samayn.

## 2.2. Caqabadda hortaagan IDG

IDG waxay ka shaqeysaa qaar ka tirsan qeybaha caalamka ee ugu caqabado badan ee ugu dhib badan waxayna garawsataa inay jirto xiisad soo jireen ah oo u dhexeysa hamigeena aan u qabno EDI iyo xaqiiqooyinka jira ee bulshada iyo dhaqanka iyo waxyaabaha laga filaayo meesha aan ka shaqeyno. Waxaa intaas dheer, macaamiisheena badanaa aad ayay u gaar yeelaan waxyaabaha ay u baahan yihiin ee loogu tala galay dadka iyo adeegyada aanu bixino. Waxay horseedaa eex iska cad oo ah meelaha qaar ganacsigeena sida saadaasha culus ee lagu samaynayo waardiyeyaasha, dal iyo dibadba. Si kastaba ha ahaatee, ballanqaadkeenu wali wuu taagan yahay waxaana had iyo jeer si firfircoon u baadi goobi doonaa inaan sare u qaadno EDI iyo habdhaqanka ugu wacan.

## 2.3. Qiimaynta Kala Duwanaanshaha

Kala duwanaantu waa fikir ka qeyb galin oo baadi goobaya inuu abuuro jawi wacan oo intii hore ka guul badan oo loogu tala galay dadka oo dhan. Waxaa taageera habdhaqanno anfaca ururka iyo dhammaan dadka gudihiisa ka shaqeeya ama la shaqeeya. Waxay talada ku dartaa xaqiiqda ah in dadku leeyihiin waxyaabo badan oo ay isaga mid yihiin, laakiin ay ku kala duwan yihiin siyaabo badan oo ay kujiraan (laakiin iyadoo aysan ku ekeyn) jinsi, da', qolo/qabiil, qofku jinsiga uu la galmoodo, awoodda jismiga, awoodda maskaxeed, diinta iyo waxa la aaminsan yahay, waxbarashada, xaaladda dhaqaalaha, shakhsiyadda, qaabka xiriirka iyo qaababka loo shaqeeyo. Fahmidda, qiimeynta iyo si wax ku ool ah u maareynta waxyaabahaasi lagu kala duwan yahay waxay gacan ka geysataa sidii loo kobcin lahaa guul ah heer shakhsi, heer kooxeed, heer urur iyo heerka intaasi ka ballaaran ee bulsho weynta.

# 3. Oraah Guud

## 3.1. Baaxadda

Waxaa naga go'an inaan xaqiijino siyaasadaha, habraacyada, fikaradaha iyo habdhaqannada sare u qaada sinnaanta gacanna ka geysta dhaqan urur oo dadka wax ka qeyb galiya.

Waxaa arrintaan kujira shaqaaleysiinteena iyo hannaanada xulashada kuwaasi oo loo naqshadeeyay inay gacan ka geystaan sidii loo xaqiijin lahaa inuusan jirin takoor aan qiil lahayn oo ku salaysan da',

naafonimo, jinsi uu ku jiro dadka baddalay jinsigoodii asalka ahaa iyo labeebka, xaaladda guurka oo ay kujirto wada noolaansho madani ah, fikir siyaasadeed, qolo/qabiil, diin iyo wax la aaminsan yahay, jinsiga qofi la galmoodo, muddo xabsi inuu qofku ku jiray kaddib markii maxkamadi xukunno ku ridday, taariikh dhaqan dhaqaale, hawl midow ganacsi loo qabto ama in midowgaasi laga tirsanaado oo xubin loo yahay, in qofka dadi ku taxaluqaan ama aysan ku taxaluqin, qaabka shaqada, ama sababo kale oo aan habbooneyn.

Waxaan diiradda saareynaa inaan samayno isbaddalo caqligal ah oo aanu ku samaynayno qabanqaabada shaqadeena, siyaasadaha iyo habdhaqannada awoodda siiya inta kala duwanaanshaheenu gaarsiisan yahay ee shaqaaluhu ay noogu soo biirayaan oo nagula shaqeynayaan, ay nagu siinayaan adeegyo, ay uga qeyb qaadanayaan mashaariicdeena, barnaamijyadeena, fasaladeena iyo imtixaanadeena aanu bixino iyo hawlaha kale.

Waxaa naga go'an inaan ula tacaamulno kalyantiga iyo macaamiisha iyo waliba dadka wax qeybsha si xaq ah, oo leh sharaf iyo qaddarin ku salaysan ballan qaadka aanu u samaynay EDI ee loogu tala galay faaiidadooda iyo in la helo oo la dammaanad qaado xushmadooda iyo kalsoonidooda.

### 3.2. Takoor aan Qiil Lahayn

Takoor aan qiil lahayn waa caqabad hor taagan sinnaanta, ka qeyb galinta iyo xaquuqul insaanka lagamana aqbalayo gudaha IDG ayadoo loo cuskanaayo dhammaan sababaha lagu qeexay gudaha Siyaasaddaan.

### 3.3. Takoorka iyo Sharciga

Tixraac wax hagaya oo muhiim ah oo loogu tala galay IDG, inkastoo dabiicigeena ballaaran ee caalamiga ah uu yahay, Qodobka Xaquuqul Insaanka ee 1998 oo uu ku jiro Heshiiskii Yurub ee Xaquuqul Insaanka ee 1952. Dalal badan oo aanu ka shaqeyno waxay saxiixeen Heshiiskaan kaasi oo tixraaca, Qodobka 14, gaar ahaan mamnuuca takoor ku salaysan jinsi, qolo, midab, luuqad, diin, fikir siyaasadeed ama fikir kale, asal jinsiyadeed ama asal bulsho, ka tirsanaanta dad laga tiro badan yahay oo dalka ku nool, hanti, dhalasho ama xaalad kale.

### 3.4. Takoor – Ujeedooyinka iyo Afkaar Khaldan oo Laiska Aamino

Takoor qasab maahan inuu u dhaco si la ogsoon yahay oo garasho ah ama si kas ah. Waxaa jira siyaabo khiyaano iyo miyir la'aan ah oo takoor ah. Kuwaasi waxay ka dhalan karaan in la sameeyo qiyaaso guud oo ku saabsan awoodaha, sifooyinka iyo danaha koox gaar ah iyo sharuudaha codsiga oo ay ka dhalan karaan, xaaladaha ama sharuudaha haddii ay anfac u leeyihiin ama manfac darro kooxo gaar ah. Marka waxaan u baahan nahay inaan taxaddarno si aan uga baaqsanno dhammaan noocyada takoorka aan qiilka lahayn iyo sharuudaha iyo xaaladaha. Waa inaan ka feejignaano habdhaqannada khiyaanada badan ee keena takoor, ka saarid dad meel ama talada laga saaro, dhiirigalin la'aanta aana ka feejignaano eex aan miyir lahayn.

## 4. Sababaha Aasaasiga ah ee Takoorka

IDG waxay leedahay waxyaabo dhowr ah oo ay si gaar ah u danaynayso oo ku jira Siyaasadeeda EDI. Waxaa

jira waxyaabo ‘aasaasi ah’ oo ah kala duwanaan, laakiin aan ahayn liis dhammaystiran. Marka loo eego sharuudaha gaarka ah ee IDG, macaamiisheeda iyo dabiiciga halka aanu ka bixino adeegyada, sababahaan asaasiga ah waa caqabad hortaagan in la hirgaliyo, waxayna la yimaadaan mixnado xoogaa ah kuwaasi oo aan dhib ahaan lahayn gudaha deegaan halistiisu hooseyso oo walwalka laga qabana uu hooseeyo.

Ayadoo tilmaameyaali kujiraan siyaasado gaar ah (sida da’aad shaqaaleysiin) shaqaaluhu waa inuu mar walba diyaar u ahaado inuu qiimeyn ku sameeyo in mixnadahaasi ay yihiin kuwo loo cududaari karo, qiimeyn lagu samayn karo ama xadgudub ku ah Siyaasadda sida ay tahay. Shaqaalaha waxaa aad loogu boorrinayaa inay xaqiijiyaan in waxyaabaha arrinkaasi laga soo reebay ee istisnada ah, isbaddalada la sameeyay ama wixii kaloo jira loo sheego Maareeyeyaasha.

### 4.1. Da’da

Waxaan aaminsannahay inay wanaagsan tahay in la haysto xoog shaqaale oo leh jiilal kala duwan iyo da’aad kala duwan. Siyaasaddeena shaqaaleysiintu waxay ku habboon tahay caqabadaha qaarkood ee ku hor gudban arrinkaan iyo dawrar gaar ah markii baahiyaha jismi ee dawrka ay lagama maarmaan ka dhigeen (sida waardiyeyaal caalami ah oo hubeysan). Meeshii caqabado aysan kujirin, majirto da’ loogu tala galay hawlgabnimo. Arrintaan waxay gacan ka geysataa sidii loo xaqiijin lahaa in duqoobid aysan horseedin fursado isa sii dhimaya waxayna nagu taageertaa inaan dad nala jaal noqda shaqaaleysiino da’ kasta ha jiraane. Tani waxay sare u qaadaa ka qeyb galinta iyo waxbarashada laga helo in lala shaqeeyo dad da’aad kala duwan jira.

### 4.2. Naafonimo

Waxaa naga go’an inaan wax ka qabano takoorka aan qiilka lahayn ee ka dhanka ah dadka naafada ah iyo sare u qaadidda in wax laga qeyb galiyo dadka naafada ah. Waxaan garawsanaa naafonimo ka maaddo ballaaran ahaan oo ay ku jiraan jismiyan, garashada iyo dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka oo ay la jiraan xaaladaha caafimaad ee daba dheeraaday ee isbadbaddala. Waxaan ka maqsuudnay in dadku badanaa aysan ku naafoobin naafonimo ayaga u gaar ah ama awood u qalanta ayaga, laakiin fikradaha guud ee bulshada iyo caqabadaha la taaban karo ee tooska ah iyo kuwa dhanka afkaarta ah kuwaasi oo keena faquuq iyo helitaan la’aanta xaquuqul insaan buuxa. Waxaan hiigsanaynaa inaan wax ka qabano arrintaan annagoo si miyir leh u ogaanayna oo meesha ka saareyna caqabadaha noocaas ah, anagoo samaynayna isbaddallo caqligal ah sarena u qaadeyna tusaalaha bulshada ee naafonimada.

### 4.3. Jinsi

Waxaa naga go’an inaan wajahnoo wax ka qabano takoorka jinsi ku salaysan. Diiradeenu waxay saaran tahay sare u qaadidda sinnaanta iyo cirib tiridda takoor aan qiil lahayn oo la xiriira dumarka iyo hablaha kuwaasi oo caalamka oo dhan si joogta ah ula kulma faaiido darro bulsho iyo mid dhaqaale, afkaar khaldan, xaglin, xadgudub iyo rabshad. Waxaan sidoo kale baadi goobeynaa inaan wax ka qabano sinnaan la’aanta ay la kulmaan ragga iyo wiilasha waxaana dooneynaa siyaabo aanu ku xaqiijino in faaiido darri aysan ku dhicin ama aan laga saarin shaqada aanu samayno. Waxaan garowsanaa in dadka lagula kaco takoor ku salaysan baddalashada jinsigooda, ama jinsi baddalasho la

iska malo awaalay, ama inay yihiin kuwo baddaly jinsigoodii asalka ahaa oo mid kale qaatay, inuu yahay qofi mid dhex gala jinsi kasta ama uu haysto aqoonsiga jinsi kale taasoo ay kujiri karto in qofi ayaan kaddibba uu jinsi kale isu rogo. Waxaan baadi goobeynaa sidii loo siin lahaa dhammaan shaqaalaheena qaddarin isku mid ah.

IDG hadda waxaa haysta eex aan laga baaqsan kareyn oo ku saabsan jinsiga shaqaalaheeda ayadoo badi shaqaaluhu iminka yihiin lab. Tani waa sharuud ay soo rogeen macaamiishu iyo xaalado laakiin waa inaan loo qaadan inay tahay *caadadeena ama xaaladda jirta*. Meeshii caqabadahaan dibadda nooga yimid aysan ku habbooneyn waxaan baadi goobeynaa sinnaanta jinsiga iyo sidii sare loogu qaadi lahaa jiheynta jinsiga – hannaanka iyo habka wixii shaqaale ah jinsi kasto ha ahaadee loogu aqoonsado inuu qeyb ka yahay qeybta weyn ee ganacsiga ayadoo fursadaha oo dhami u furan yihiin.

### 4.4. Qolo/Qabiil iyo Dhaqan

Waxaanu garawsanay in takoor qolo uu yahay dhacdo adag oo ku salaysnaan karta qolo, jinsiyad, diin, dhaqan iyo/ama midab iyo calaamadeeyeyaal kale oo jirka dadka la xiriira oo lala xiriirshay qabiil inuu qofi ka tirsan yahay.

Shaqada IDG waxaa hodmiya isku darka qabiillada/qolooyinka kala duwan, kooxaha leh dhaqamada kala duwan iyo beelaha kala duwan ee aanu la shaqeyno waxaana baranay in dhaqan isku jir ah oo hodan ah iyo isfaham ay ku leeyihiin dawr muhiim ah is wada fahmidda iyo wax wanaagsan isweydaarsiga.

### 4.5. Diin iyo Wax la Aaminsan yahay

Waxaan qiimeynaa oo aan qaddarinaa diimaha/waxyaabaha shaqaaluha iyo dadka kalee dibadda shirkadda ka yimid ee la shaqeeya ama ka dhex shaqeeya IDG ay aaminsan yihiin, iyo gudaha bulshooyinka aanu ka dhex shaqeyno. Waxaan isku daynaa inaan xaqiijino in baahiyaha iyo waxyaabaha la doorbido la waafaqo.
Waxaan bixinaa qol loogu tala galay iimaanka ama qol shanqar aan lahayn oo lagu tukado, kaasi oo loogu tala galay fikirka in lagu dejiyo ama ayaar loogu dhex fakaro.Waxaan u diyaarinaa sida loogu baahan yahay isticmaalka dabacsan ee xarumaheena.

Markii ay jiraan sharuudo shaqo oo ay iska hor imaan karaan bahiyo gaar ah oo dhaqan ama diineed, waxaan si taxaddar leh uga fakarnaa in ay si caqli gal ah wax lagu kici karo tahay in la kala duwo ama la qabatimo arrimahaas si loo awood siiyo daboolidda baahiyahaas.

### 4.6. Jinsiga uu la Galmoodo Qofi

Waxaa naga go'an taageeridda dumarka dumarka u galmooda, khaniisiinta, labo jinsilaha, iyo dadka jinsiyada iska soo horjeeda ah ee isu galmooda si ay u dareemaan in laga qeyb galiyay shaqada lana qiimeeyay. Waxaan aaminsan nahay in dhammaan dadka jaalka ah ee wada shaqeeya ay xaq u leeyihiin inay waxay yihiin ay ku kalsoonaadaan shaqada markii ay kujiraan ayadoo aysan ahayn inay ka walaacaan inay la wadaagaan dadka kale oo ay u sheegaan waxyaabo ka mid ah waxa ay yihiin. Waxaa naga go'an inaan wax ka qabano takoorka iyo dhibaateynta ka dhanka ah dumarka dumarka

kale u galmooda, khaniisiinta,shaqaalaha labo jinsilaha ah iyo taageeridda sidii wax looga qeyb galin lahaa iyaga.

Waxaan dhammaanteen ogsoonnahay in sharuucda iyo dhaqamada dalal badan oo aanu ka shaqeyno ay gaar ahaan cadaawad u muujiyaan dumarka isu galmooda, ragga khaniisiinta ah iyo dadka labo jinsiga ah. Tani waxay caqabad gaar ah ku tahay IDG laakiin waxaan baadi goobeynaa inaan bixino jawi taageero oo loogu tala galay dhammaan dadka jaalka ah ee la wada shaqeeyo iyo macaamiisha ayadoon loo eegeyn aqoonsigooda dhanka galmada.

### 4.7. Sinnaanta iyo Mushaarka

IDG waxaa ka go'an mabda'a in mushaar isku in ah la siiyo ragga iyo dumarka. Xaaladdaan gudaheeda "mushaar" ma ahan gunnada oo qura laakiin waxaa kujira sidoo kale faaiidooyinka shaqaaleysiinta sida waxyaabo dheeraad ah iyo waddo loo maro xarumaha ku xusan xirmada shaqaaleysiinta taasi oo la bixinaayo waqti ka waqti.

Haweenka iyo ragga aanu shaqaaleysiinay waxay xaq u leeyihiin mushaar is le'eg in la siiyo haddii ay qabtaan shaqo isku mid ah ama isku qiime u leh ururka waa haddii aysan jirin sababo gaar ah oo cad oo aan la xiriirin jinsigooda kuwaasi oo sharraxaad ka bixiya oo u cududaara wax kala duwanaansho ah in lagu sameeyo qarashka la siiyo. Xaaladaha qaarkood, shakhsiyaadka isku shaqo qabta waxaa laga yaabaa in ay helaan mushaaraad kala badan kala sarreynta darajada aawadeed, dhibco mushaar kordhin dartood, khibrado aqooneed iyo sababo kuwaasi la mid ah.

### 4.8. Waxyaabaha la Tabanayo iyo Cabashooyinka

Waxaa la rajeynayaa in arrimaha la xiriira cabashooyinka loola tacaamuli karo si aan rasmi ahayn, ugu yaraan marka ugu horreysa, xaqiiqdiina loo xallin karo si aan rasmi ahayn. Shaqaalaha qaba cabasho wuxuu la xiriiri karaa maareeyeyaasha ama shaqaalaha qaabilsan shaqaalaha [HR[. Dhammaan cabashooyinka waxaa loola tacaamuli doonaa si qarsoodi ah. Haddii xulashadaan aysan macquul ahayn, dhammaan shaqaaluhu waxay awoodaan inay walaacyada ay qabaan ku soo gudbiyaan Habraacyada Siyaasadda Cabashada ee IDG.

Dadka dibadda shirkadda ka yimid ee doonaya inay soo gudbiyaan cabasho waa inay adeegsadaan Siyaasadda Cabashada ee IDG.

## 5. Mas'uuliyadaha

In laga shaqeysiiyo Siyaasadda EDI waa mas'uuliyadda shakhsi kastoo shaqaale ah. Dhammaan shaqaalaha oo ay kujiraan kuwa kasoo shaqeeya dhanka guriga, haddii ay yihiin shaqaale waqti buuxa shaqeeya ama galin qura, kuwo haysta qandaraas muddo aan la qeexin, muddo go'an ama kumeel gaar ah, ayadoon loo eegeyn inta ay shaqeynayeen, waxaa ay mas'uul ka yihiin inay qeybtooda buuxda ka qaataan u hoggaansamidda siyaasadaan. Arrintaan waxaa macnaheedu yahay in aad loo barto siyaasaddaan iyo sharuudaheeda iyo sidii loo fulin lahaa iyo weliba ayadoo aad loo baarayo aragtiyo lagu xaqiijinaayo in takoor aan la ogolaan inuu saamayn ku yeesho xukun soo saaridda.

Jiritaanka Siyaasaddaan EDI kaligeed ma horjoogsan karto takoor. Waxaa muhiim ah in qof waliba uu xil shakhsi ahaaneed iska saaro inuu gacan ka geysto sidii loo xaqiijin lahaa in deegaanka shaqada uu

waafaqayo xiriirada dhaqanka, qaddarinta sharafta qof walba si leh sharuudo ballaaran, inuu qiimeeyo kala duwanaanshiyaha dadka u dhexeeya iyo dhaqamada. Intaas waxaa dheer, waa inaan ku toosno oo baadi goobno sidii wax loogu dhisi lahaa wixii aan wadaagno aana si guud u joogteyno ujeedooyinka xiriirradeena dhaqanka.

Dhammaan shaqaalaha waxaa lagu taageeri doonaa inay ogaadaan qaababka takoor aan qiil lahayn uu lahaan karo, si looga ilaaliyo iyo si looga baaqsado wixii tillaabo ah ee saameyn ku yeelan kara dad kale ee ku qaadi kara inay ku kacaan takoor aan xaq ahayn. Arrintaan waxaa lagu guuleysan karaa ayadoo la adeegsanayo maareynta IDG heerar kasta markii la marayo, oo dhammaan shaqaalahana waxaa laga doonayaa inay fahmaan oo ay hirgaliyaan Qiyamyada IDG iyo Siyaasadda  Aaminaadda.